



Si wadajir ah, Waxaan u hagaajin karnaa Cimilada Seattle Annago adeegsanayna Doorashooyinkeena Safarka!

Safarrada baabuurta ama kuwa xamuulka qaada ayaa ah ilaha ugu waaweyn ee wasakhawga iyo isbedelka cimilada Seattle. Inta badan safarradan waxay dhererkoodu ka yar yihiin saddex mayl waxaana loo isticmali karaa gaadiidka, ama baaskiilka ama socodka. Taas macnaheedu waa doorashada safarka ee aad sameyso waxay saameeyn weyn ku yeelan kartaa bey'adeena mustaqbalka. Waaxda Gaadiidka Seattle (SDOT) waxay ka shaqaynaysaa hagaajinta jidadkeena si ay u taageerto doorashooyinka gaadiidka waara. Waxaan rabnaa inay kuu fududaato, ku badbaado, lana awoodi karo inaad doorato siyaabo aad u safarto oo aan waxyeello u geysan meeraha.



Dhammaanteen Waxaan U Noqon Karnaa Horyaalka Cimilada Qoyskeena, Saaxiibadeena, iyo Bulshadeena!

SDOT waxay haddaba isbedel ku samaynaysaa qorshayaashayada, mashaariicda, iyo sida aan u naqshadeeyno jidadkeena. **Qaabdhismeedka Jawaabta Isbeddelka Cimilada (CCRF)** waxay tusinaysaa sida aanu uga shaqaynayno inaanu kuu fududeeyno inaad doorato doorashooyin safar oo waara. Iyo wakhtiyada ay tahay inaad kaxayso, waxaanu ka caawinaynaa inaad u badalato baabuurta korantada si sahlan.



Tallaabo Cimilo waxay u baahan tahay inaga oo dhan inaan qaadno. Aynu wada qaadno tallaabada xigta.

Waa kuwan waxa SDOT samaynayso si loo fududeeyo safarka waara:

- Dhisidda waddooyin badan oo basaska iyo baaskiillada ah, waddooyin badan oo lugta ah, iyo abuurista goobo dadweyne oo qof walba uu ku raaxaysto.
- Hagaajinta gaadiidka dadweynaha si ay u noqoto doorasho weyn oo la heli karo.
- La shaqaynta shirkadaha si ay u isticmaalaan baabuurta xamuulka ah iyo gaadiidka aan waxyeellada ugu badan u geysan deegaanka.
- Taageerida isticmaalka baabuurta korantada Magaalada Seattle.
- Beeritaanka geedo badan iyo ku kordhinta cagaarka hareeraha waddooyinka.



Dadaalladaan waxay ujeedadoodu tahay in hawadeena nadiif noqoto, taageerno meheradaha maxalliga ah, iyo abuurista goobo madadaalo oo dadku ku raaxaystaan bannaanka. Waxaan sidoo kale diiradda saareynaa hubinta in hagaajintaan ay caawineyso qof walba, gaar ahaan kuwa ay aadka u saameeyeen isbeddelka cimiladu.



Waxa Aad Ku Caawin Karto

- Ka fakar sida aad maalin walba u Safarto. Ma socon kartaa, baaskiil ku wadi kartaa, ama ma raaci kartaa bas ama tareen intii aad Gaari wadi lahayd?
- Kala hadal qoyskaaga, saaxiibadaa, iyo deriskaaga sidii ay u dooran lahaayeen siyaabo ka cagaaran oo loo safro. Xitaa waxaad tusi kartaa sida loogu safro!
- Xusuusnow, tallaabo kasta oo yar waxay caawisaa la dagaallanka isbeddelka cimilada. Doorashooyinkaagu waxay sameeyaan isbeddel wanaagsan.
- Ku biir wada-hadalka ku saabsan sida gaadiidku u saameeyo isbedelka cimilada. Nagu soo booqo www.seattle.gov/transportation/about-us/climate-response si aad wax badan uga ogaato shaqada SDOT.

